



## Cleveland oo qabatay kulan lagu maamuusayo Bulshada Dhaladka ah ee Maraykanka

Cleveland oo qabatay kulan si ay maamuusto Bulshadeeda Dhaladka ah ee Maraykanka isla markaana u aqoonsato waqtigii tegay, ka la joogo iyo mustaqablka ee la xiriira dugsiga. Dhacdada waxaa loo yaqaan RISE, oo ka dhigan Dib ula soo noqoshada Aqoonsiga Dadka dhulka loogu yimid iyada oo la isticmaalayo Midnimo iyo Waxbarasho, waxaana Maajo 2 lagu qabtay goobta wax lugu soo bandhigo ee dugsiga.

Martida waxaa ka mid ahaa Hindida Dhaladka Maraykanka oo wax soo bandhigayay isla markaana hadalo soo jeedinayay oo ka kala socday qabiilada ku kala nool Oregon, Washington, Idaho, Montana, Wisconsin iyo Alaska. Dhacdada waxaa soo abaabulay Isbahaysiga Cleveland ee loogu talagalay Sinnaanshaha Jinsiga wuxuuna qayb ka ahaa barnaamijka “nidaamkii gumeysiga” ee dugsiga si loo aqoonsado taariikhdiisii hore ee dhacday, oo ay ka mid tahay tusaalooyinka qaadashada dhaqameed. Sanadkii 1988, dugsigu wuxuu beddelay astaantiisu ‘mascot’ ee ahayd Indians isaga uu u beddelay Warriors, iyada oo wargeyska ardayda laga beddelay magaca Tomahawk oo lagu beddelay Clarion.

Dugsigu wuxuu sidoo kale ku dhawaaqay magaca cusub ee kooxdiiisa qoob ka ciyaarka, oo hadda loogu yeeri doono Tenacity. Kooxda waxaa hore loogu yaqaanay Sundancers, kaasi oo ahaa magac soo jiray ilaa noqoshadii Warriors. Si kastaba ha ahaataa Ardayda Dhaladka Maraykanka ayaa hadal ka keenay kaasi oo la xiriira magicii hore ee kooxda qoob ka ciyaarika, iyaga oo ku andacooday in sundancing ay tahay meel muqaddas u ah dhowr qabiil oo ku nool Plains.

[Fiiri sawirro buuxa oo ka socda kulanka](#)